



Barnaamijka Isdiiwaangalinta iyo Isku-Dheelitirka: Shaqadda Wajiga 2aad Waxay Isbedelo Ku Keentay, Dugsiyada Manhajka Gaarka Leh iyo Barnaamijyada Dugsiyada Dariska

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Wajiga labaad ee shaqada barnaamijka isdiiwaangalinta iyo isku-dheelitirku waxay gashay maraxalada muhiim ah, iyada oo aan rabno inaan idinla wadaagno soo jeedimaha aan rabno in la meel mariyo, sidoo kalena waxaa laga hadli doonaa si waxa looga qabto arrimihii soo ifbaxay intii lagu gudo jiray hawsha.

Bishii Febraayo, Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay amreen in shaqaaluhu la shaqeeyaan Isbahaysiga Hagidda Koonfur-Bari (SEGC) sidii loo gaari lahaa dhowr himilo kuwasi oo kala ah:

- In laga bedelo qaabka Harrison Park K-8 iyada oo laga dhigayo dugsi dhexe oo dhammeystiran iyo in la abuurdo qaabkii dugsiyadii ay ka iman lahaayeen ardayda imaneyso dugsiyaasi dhexe
- In loo raadiyo goob la geeyo ardaydii Harrison Park ee K-5
- In la kordhiyo isdiiwaangaliinta ardayda Dugsiya Dhexe ee Lane

Wajiga barnaamijka isku dheelitirka ee SEGC iyo tallaabooyinkii la soo jeediyey sidii loo dheelitiri lahaa isdiiwaangalintu waxay soo dedejisay sanaan la'aanta hadda aynu waajahayaan qaar ka mid ah barnaamijyada labada luqadood wax lagu dhigo (DLI) ee dugsiyadeena K-5, kuwaasi oo wadaaga dhismayaasha barnaamijyada dariska dugsiyada (ee loo yaqaano dhismaha la wadaago). Marka aad eegto warcelinta ra'yiga aan ka helayno qoysaska iyo shaqaalaha, waxaan ogaanay dhismaha la wadaagayaa barnaamijka labada luqadood wax lagu dhigo (DLI) iyo dugsiyada darisku ay kala qeybsadeen shaqaalihii iyo agabyadii ay saameyn weyn ku yeelatay awoodii si buuxda loo taageri lahaa ardayda cusub ee labada luqadood ku hadasha. Haddaba si wax looga qabto sinnaan la'aantaasi, waxaan soo jeedineynaa qaab cusub oo dugsiyada Labada Luqadood Wax Lagu Dhigo (DLI). Bariga Koonfureed ee magaalada Portland, halkaasi oo isdiiwaangalinta iyo barnaamijka isku dheelitirku hadda ka socdo, isbedelku wuxuu saameyn guud ku yeelan doonaa labo luqadood oo kala ah kuwan soo socda:

- Shiinaha, luqadani oo barnaamijka Labada Luqadood Wax Lagu Dhigo ee Dugsiya oo dhan loo rari karo dugsiya Bridger ama Woodstock
- Isbaanishka, barnaamijyada dugsiya oo dhan ee dugsiya Lent ama Bridger

Ugu dambeyn qaabka Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Dhigo (DLI) ee dugsiya oo dhan waxay saameyn doontaa dhammaan dugsiyada degmada. Waxay noqon doontaa qaab ay qaataan dugsiyada K-5, maadaama ay sanadadda soo socda ay hawsha barnaamijka isdiiwaangalinta iyo isku dheelitirku ay

gaari doonto goobo kale. Barnaamijyada Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Qaato(DLI) ee aan haysan arday ku fulan qaabka waxbarashada dhammeystiran, sida luqadaha Ruushka iyo Fiirnaamiiska, waxay ahaan doonaan hadda kuwa dhisme sii wada deganaada .

Qaabka Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Qaato(DLIA) waa ay ka duwanaan doontaa heerka fasalada 6aad ilaa 8aad. Barashada luqada iyo waayo-aragnimada ay helayaan waxay kaabi doontaa shaqada laga qabanayo heerka dugsiyada dhexe.

Intaas waxaa dheer, Dugsiga Creative Science K-8 wuxuu u guuri doonaa dhismaha Clark isaga oo noqon doona dugsi leh manhaj gaar ah/dugsiga dariska,iyaka oo raacaya qaabka dugsiga Sunnyside(deegaanka) iyo Buckman (farshaxanka). Goobaha la soo jeediyey waxa weeye Woodstock iyo Arleta. Tani waxay dhismaha Clark u oggolaan doontaa inuu hoy u noqdo ardayda K-5 Harrison Park ee u dhow.

Haddaba si loo xaqiijiyo in la gaaro yoolka guud waa in “arday kastaa helaa dugsi kasta waayo-aragnimo waxbarasho oo wanaagsan,” waxa uu bartilmaameedkayagu yahay ugu yaraan inaan diiwaangalino 500 arday dugsi kasta oo dhexe, iyo 270 arday oo dugsi kasta K-5 ah. Tirooyinkani, waxaan aaminsanahay inay inoo horseedi doonaan barnaamijiyo loo siman yahay oo ay ka mid yihiin waxbarashada aasaasiga ah iyo waxbarashada la kobciyey. Waxaa jiri doona faahfaahino dheeraad ah oo wali laga shaqeynayo oo bilaabmaya kulanka maanta ee Isbahaysiga Hagida Koonfur-Bari Portland (SEGC). Waxaa sidoo kale jiri doona fursado aan ku kulano bisha Noofembar 8. Soo jeedinta iyo ra’yiga bulshada oo faahfaahsan waxaa lagu soo qori doonaa [Shabakada Barnaamijka Isku-dheelitirka iyo Isdiiwaangalinta](#). Go’aanka golaha kama dambeysta ah ee xuduudaha, isdiiwaangalinta iyo goobaha barnaamijyada waxaa la sameyn doonaa bisha Febraayo.